

Washington Apple Health

Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga iyo Wakhtiyada kamadambaysta ah

Adiga waxaad xaq u leedahay maamul dhagaysi hadii aadan nagu raacsanayn qaraarkeena kaas oo diidey, dhameeyay, ama bedelay ceymis kujiridaada Washington Apple Health.

- Waxaad haysataa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda kuqoran dusha sare ee ogaysiisnaan kuusoo dirnay si aad ugu codsato dhagaysi. Haddii aadan dhagaysi kucodsan gudaha 90 maalmood, waxaa dhici karta in aad weyso xaqaada aad u leedahay dhagaysi.
- Haddii aad doonaysid in aad sii wadatid ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga, wakhtiga kamadambaysta ahi waa 10 maalmood.
Kafiiri hoos **ceymis kujirida Soconaysa inta lagu guda jiro hawsha maamulka dhagaysiga.**
- Adiga waxaad muraajaco kusamayn kartaa sharciyada dhagaysiga kujira Xeerka Maamulka Washington (WAC), cutubka 182-526.
- Waxaa dhici karta in aadan yeelan xaq dhagaysi ah hadii ceymis kujiridaada ladiido, dhammaato, ama isbedesho sababtoo ah qaanuunka gobolka ama dowlada wuu isbedelayaa wuxuuna isla markiiba isku si saameyn ugu yeelanayaa dhammaan dadka kuqoran barnaamijka (RCW 74.09.741(3)).

Haddii aad tahay qof dakhligiisu-yaryahay, Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha (CLEAR) ayaa dhici karta in uu kugu caawiyo helida caawimaad lacag la'aan oo sharci ah. Waxaad kacodsan kartaa boggaan intarnatka <http://nwjustice.org/clear-online>, ama:

- Haddii aad tahay qof kahooseeya da'ada 60 sanno, kawac Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha (CLEAR) lambarkaan 1-888-201-1014.
- Haddii aad tahay qof da'adiisu tahay 60 ama kaweyn, kawac Madaxa Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha lambarkaan 1-888-387-7111.

Ceymis kujirida socota inta lagu guda jiro hawsha maamulka dhagaysiga

- Haddii aynu dhamayno ceymis kujiridaada Washington Apple Health, waxaad awoodaa in aad haysatid ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga. Haddii aynu bedelno ceymis kujiridaada Washington Apple Health, waxaad haysan kartaa heerkaada ceymis kujirida hore ee la oggolaaday inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga.
- Si aad usii wadid helida ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha maamulka dhagaysiga, waxa khasab kugu ah in aad dhagaysi kuweydiisato gudaha 10 maalmood oo laga joogo marka aad ogaysiisnaan heshid ama dhammaadka bisha, mid kasta mida danbeysa.
- Haddii aad hesho ceymis kujirid soconaysa kadibna weyso dhagaysigaada, waxa dhici karta in ay khasab kugu noqoto in aad bixiso ayidaad lagu ayidayo 60 maalmood oo kamid ah ceymis kujirida socotay.
- Ma awoodid in aad heshid ceymis kujirid marka aad sugayso dhagaysi si aad u waajahdo diidista codsigaada Washington Apple Health.

Codsashada maamulid dhagaysi

Si loo codsado maamul dhagaysi, ama hadii aad doonaysid tarjumaan ama caawimaad kale si aad u codsato dhagaysi, samee mid kamid ah waxyaabahaan soo socda:

- Wac 1-855-WAFINDER (1-855-923-4633) ama 1-800-562-3022.
- Qor warqad codsasho dhagaysi ah ama buuxi Foomka Codsashada Maamulka Dhagaysiga HCA 12-511 (taas oo laga helo boggaan intarnatka <http://www.hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/forms-and-publications>) iyo

Faakis ugu dir lambarkaan 1-360-586-9080; ama Boosto u dir dhinaca:

Health Care Authority
PO Box 45504
Olympia, WA 98504-5504

Anaga waxaan muraajaco kusamayn doonaa dacwadaada ama xaaladaada kadibna waxaan isku dayi doonaa in aynu xalino mowduuca kahor dhagaysiga maxkamada.